

# Waaxda Ilaalinta Qaxootiga, Ogaysiiska in La yimaaddo, Lifaaqa A

## COVID-19 Tallaabooyinka Caafimaadka iyo Badbaadada.

Guddiga Socdaalka iyo Qaxootiga Kanada (IRB) waxay sii wadaan hubinta qaar ka mid ah tallaabooyinka caafimaadka iyo badbaadada muhiimka ah ee la xiriira COVID-19 in la xafido si loo ilaaliyo qolka dhegeysiga ka-qaybgalayaasha, shaqaalaha, iyo booq-dayaasha.

Fadlan ka warqab xaddiditaanada soo socda:

**Dacwoodayaasha:** Dacwoodayaashaka yar 18 uma baahna inay soo xaadiraan dhegaysiga Waaxda Ilaalinta Qaxootiga (RPD) haddii aanay RPD u baahneyn soo xaadirkooda, in kastoo laga yaabo inay soo xaadiraan haddii iyaga iyo wakiilkooda la magaacabay ay rabaan. RPD waxay jadwal u qabataa dhegaysiyada si loo xaqiijiyo in shuruudaha kala fogaanshaha la buuxiyay, markaas oo tirada ka qayb galayaasha ee dhegaysiga laga yaabo in la xadiday. Fadlan ku wargeli RPD qoraal ahaan (macluumaadka xidhiidhka waxaa laga helaa Ogaysiiska imaatinka) ugu yaraan 10 maalmood kahor taariikhda dhegaysigaaga haddii aad niyadda ku hayso inaad keento dacwoode ka da'yar 18 sano.

**Goob joogayaasha:** Fadlan ku wargeli RPD qoraal ahaan ugu yaraan 10 maalmood ka hor taariikhdaada dhegaysiga haddii goob jooge uu adiga ku soo raacayo (tusaale taageero caadifadeed wixii ah).

**Markhaatiyada:** Waxaad keeni kartaa markhaatiyo xagga dhegaysigaaga. Sida waafaqsan sharciyada RPD waa inaad ku wargelisaa RPD qoraal ahaan ugu yaraan 10 maalmood ka hor taariikhdaada dhegaysiga ee magaca markhaatiga(yada), sababta caddayntooda, inta ay leegtahay caddaynta la filayo in loo qaado xidhiidhkaaga(yada) markhaatiga iyo haddii loo baahan yahay turjubaan. Waa inaad sidoo kale ku wargelisaa RPD qoraal ahaan ugu yaraan 10 maalmood ka hor taariikhda dhegaysigaaga haddii markhaatiga(yada) uu imanayo qof ahaan ama habka telefoonka. Haddii ay suurtagal tahay, fadlan habee in markhaatigu kusoo galo habka telefoonka.

Waxaa lagaaga baahan yahay inaad la tashato [tallaabooyinka caafimamadka iyo badbaadada IRB](#) marka aad hesho ogaysiiskaaga.